


BUUGA IV

waxa aad filan karto

CODSIGAYGA MAGANGALYADA



SOO DHAWWOOW!



Sheekadan waxay ku saabsan tahay afar dhallinyaro — sida adiga oo kale ah.

Waxay si nabad ah ku yimaadeen Yurub ka dib safar dheer.

Qaar ka mid ah dhallinyarada ayaa kelidood yimid. Qaar kalena waxay la yimaadeen qoys. Waxay qabaan su'aalo badan — waxaana ka caawinaya dadka ka shaqeeya meesha ay ku nool yihiin.



Sheekadan sidoo kale adiga ayey ku caawin kartaa!

Waxaad baran doontaa:

- **habraaca magangelyada** waxa ay ka dhigan tahay
- waxa aad filan karto
- sababta ay muhiimka kuugu tahay inaad ka qayb qaadato oo la shaqeyso saraakiisha
- yaa ku caawin kara?
- wax ku saabsan xuquuqdaada

Waxaad akhryn kartaa sheekadan:

- keli
- la jiro saxiib
- lajiro qof halkaan ka shaqeeya






Qaado wakhtigaaga. Waa SAX inaad joojiso oo dib uga soo noqoto mar kale.

Haddii wax ay adag yihiin in la fahmo, **weydii qof kuu sharxa**.

Masuulkaaga, shaqaalaha bulshada ama qareenka ayaa kaa caawin kara.

DHAMAADKA, WAXAAD KA HELI DOONTAA:

-  bog leh macluumaad deegaanka
-  su'aalo xiiso leh
-  meel aad ku qori karto su'aalahaaga iyo inaad ku darto xiriirro waxtarka leh

Carruurta ka yar 18 sano oo keligood yimaada, waxaa loo magacaabi doonaa masuul. Qaar ka mid ah waddamada, masuulka waxaa sidoo kale loogu yeeraa wakiiil. Sidoo kale, qaar ka mid ah waddamada, **codsashada magangelyada** waxaa loo yaqaannaa **codsashada ilaalinta caalamiga ah**.



Ugu dambeyntii, ogow in dhammaan adeegyada lagu bixiyo xarumaha soo dhawaynta ee aad joogto ay yihiin bilaash. Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha uu kaa codsado lacag, la hadal sarkaalka aad ku kalsoon tahay ama ilaaliyahaaga.

LA KULAN SHAQSIYAADKA SHEKADAAN KU JIRA


Mohamed

Waxaan ahay 17 sano jir. Waan faraxsanahy inta badan. Waxaan jeclahay inaan caawiyo qoyskeyga iyo asxaabteyda marka aan awoodo. Waxaan keligay yimid dhowr toddobaad ka hor waxaana raadinayaa awoowgay. Waxaan xiiseynayaa inaan bilaabo shaqo.



Ahmed

Waxaan ahay 15 sano jir Waxaa Ila socday walaashay weyn Jasmine, oo ila jirtay tan iyo markii hooyaday geeriyootay. Waxaan jeclahay inaan waqti la qaato dadka iyo inaan saaxiibo cusub sameeysto. Runtii waxaan jeclaan lahaa inaan ku noqdo iskuulka sida ugu dhaqsaha badan. Waqti xaadirkan, waxaan baranayaa luqadda deegaanka halkan.



Jasmine

Waxaan ahay 24 sano jir Waxaa ila socday walaalkay, Ahmed, oo aan ugu dadaalo sidii ugu wanaagsan ee aan u daryeeli karo. Waxaan nimid dhowaan waxaana isku dayeynaa inaan ku biirno adeerkay oo muddo ku noolaa Yurub. Waxaan jeclahay ciyaaraha waxaana aad ugu fiicanahay kubadda cagta.



Adam

Waxaan jahay 9 sano jir. Waxaan halkan joogaa keligay. Hada, waxaan goaansadey inaan hadlin. Waxaan la soo kulmay waxyabo xun oo badan intaan halkaan imaan kahor. Waxaan u baahanahay waqti ka hor inta aan mar kale hadlin. Laakiin waan caqli badanahay oo waan fahmaa wax walba. Waxaan ahay dhageyste wangsana waxaana rabaa inaan dugsi tago. Waxaan jeclahay dhammaan saaxiibada cusub ee aan illaa hadda samaystay.



Ms Ines

Waxaan ahay masuul ka shaqeeya xarunta soo dhawaynta. Waxaan isku dayaa inaan taageero dhammaan carruurta iyo dhallinyarada codsanaya magangelyada sida ugu wanaagsan ee aan awoodo. Waxaan jeclahay cunto karinta, wayna i farxad gelisaa marka qof walba mashquul yahay oo firfircoon yahay. Jimicsigu wuxuu dhammaanteen naga dhigaa kuwo qaba caafimaad jidheed iyo maskaxeedba.



Mr Fred




Waxaan ahay la-taliye sharci, taasoo ah nooc qareen ah. Waxaan halkan kala shaqeeyaa asxaab badan oo si fiican loo tababaray. Waxaan siiyaa macluumaad iyo taageero dhammaan codsabayaasha magangelyada arrimaha sharciga iyo codsiyada magangelyada. Waxaan jeclahay xirashada funaanado midabo leh oo fariin ku qoranatahy.




Mahad weyn ayaa u sugnaatey dhammaan dhalinyarada codsaday magangelyada ee akhriyay sheekadan ka hor inta aan la daabicin iyo kuwa ka caawiyey in si qurux badan loo dhammeeyo.

Waxay sidoo kale ka caawiyeen doorashada magacyada shaqsiyada waaweyn.

Mahad ayaa sidoo kale u sugnaatay mas'uuliyiinta Malta iyo Netherlands oo taageeray doodaha lala yeeshay dhallinyarada.



SALAAM MR FRED, WAXAAN RABNAA INAAN WAX BADAN KA BARANNO HABRAACA MAGANGELYADA!



... IYO WAXA DHACA INTA LAGU JIRO WAREYSIGA SHAQSIGA AH EE MAGANGELYADA...




...IYO MARKA AAD GO'AAN HESHO...




CAJIIB, WAXAAD QABTAA SU'AALO BADAN! WAXAAN KU SIIN DOONAA DULMAR GUUD. FAAHFAAHINTA KU SAABSAN XAALADDAADA GAARKA AH, DIB U SOO NOGO WAANAN KULU SHEEGI DOONAA WAX BADAN.





HADDII AADAN KU LAABAN KARIN DALKAGA SABAB AH AMMAAN DARRO, WAXAAD CODSAN KARTAA MAGANGELYO.

IN KASTA OO QOF KASTAA XAQ U LEEYAHAY INUU CODSADO MAGANGELYO, QOF KASTAA MA HELI DOONO ILAALIN.



MAXAAD KA WADDAA ILAALIN?

ILAALIN WAXAY KA DHIGAN TAHAY INAAD KU SII NAGAAN KARTO DALKA AAD KA CODSATAY MAGANGELYADA INTA AAD U BAAHAN TAHAY.




HADDII AAD HESHO ILAALIN AMA AADAN HELIN WAXAY KU XIRAN TAHAY SABABAHA AAD U AAMINSAN TAHAY IN DALKAGA AANU AAMIN AHAYN. TUSAALE AHAAN...

Haddii aad ka bageyso inaad dib ulaabato sababta oo ah:

- nooca midabkaaga
- Diintaada, dhaqankaaga, ama caadooyinka aad ku dhaqanto
- qowmiyaddaada
- aragtidaada siyaasadeed ama tan qoyskaaga
- qofka aad jeceshahay oo aad rabto inaad la joogto
- koox aad ka tirsan tahay oo aan la aqbalin



... INTAA WAXAA DHEER, WAXAA LAGA YAABAA INAAD HESHO ILAALIN HADDII UU DALKAGA KA JIRO DAGAAL AMA HADDII LAGUGU SAMEEYO DHIABAATO KALE OO RABSHAD LEH MARKAAD KU LAABATO.



KUWAAN WAA XAALADO QAAR OO SABABA IN DADKA KA CARARAAN DALALKOODA.




HADDABA, HADDII AANAN AMAAN AHAYN OO DALKAYGU AANU I ILAALIN KARIN AMA AWOODI KARIN, MA CODSAN KARAA MAGANGELYO?






XAQIIQATAN!

DALAL QAAR, GABADHA AHAAN WAXAY NOQON KARTAA KHATAR MAADAAMA GABDHUHU AYSAN SI XOR AH U DHAQAAQI KARIN, LAGA YAABO IN LAGA MAMNUUCO ISKUULKA AMA LAGU GASBO GUUR, HALKA...



... DALAL KALE, DADKA WAXAA LAGA YAABAA INAY HALIS KU JIRAAN SABABTA OO AH XAALAD CAAFIMAAD AMA NAAFO AY LEEYIHIIN.









SARAAKIISHU WAXAY KU WEYDIIN DOONAAN SU'AALO BADAN SI AY U OGAADAANWAX WALBA OO SUURTAGAL AH OO KU SAABSAN ADIGA. LA WADAAG SHEEKADAADA.



SIDOO KALE, QOF KASTA OO KA YAR 18 JIR OO KELIGIIS IMANAYA WAA INUU ISLA MARKIIBA U SHEEGA SARAAKIISHA MAADAAMA CARRUURTU U BAAHAN YIHIIN TAAGEERO KA BADAN DADKA WAAWEYN.





KADIB, MASUUL KU MEEL GAAR AH AYAA LAGUU MAGACAABI DOONAA. 3 TODDOBAAD GUDAHOOD MARKA AAD CODSATO MAGANGELYO, MASUUL JOOGTO AH AYAA LAGUU MAGACAABI DOONAA SI UU KULU TAAGEERO.

SARAAKIISHA KULA HADLAYSA WAA TABABARAN YIHIIN WAXAYNA ISKU DAYAYAAN INAY KU TAAGEERAAN.

WAXAY ISKU DAYAAN INAY TIXGELIYAAN RABITAANKAAGA, BAAHIYAHAAGA IYO WELWELKAAGA KA HOR INTA AAN LA GAARIN GO'AAMO MUHIIM AH. WAXAY SIDOO KALE WAX KA AKHRIYAAN DALKAGA SI AY U FAHMAAN XAALADDAADA SI WANAAGSAN.









WAXAA LA II SHEEGAY INAAN 'XAREEYO' CODSIGAYGA, MAXAY TAASI KA DHIGAN TAHAY?



WAXAA LAGU WAYDIIN DOONAA INAAD LA WADAAGTO MACLUUMAAD KU SAABSAN SABABTA AAD UGA TAGTAY DALKAGA OO AANAD KU LAABAN KARIN, FAAHFAAHINTA SAFARKAAGA IWM.



WAXAA JIRA FARQI YAR DALBA DAL. QAAR, DIIWAANGELINTA IYO XAREYNTA WAXAY DHACAAN HAL KULAN, QAAR KALENA SI GOONI AH AYEY U DHACDAA.



HADDII AAD LA KULANTO MAS'UULIYIINTA LABA JEER...




...WAXAY GELIN DOONAAN MACLUUMAADKAAGA NIDAAM KOMBIYUUTAR 21 MAALMOOD GUDAHOD MARKII AAD IS DIIWAANGELISAY. HADDII DAD BADAN YIMAADAAN, WAXAA LAGA YAABAA INAY QAADATO WAQTI DHEER.



...IYO CARRUURTA LA IMAANAYSA WAALIDIINTOODA WAXAA LAGU DARI KARAA CODSIGA MAGANGELYADA WAALIDKOODA, IYADOO LAGU SALEYNAYO DA'DOODA.





WAXAAD WEYDIIN KARTAA SU'AALO MASUULKAAGA. HADDII AAD LA JOOGTO QOYSKAAGA OO AYSAN HUBIN WAXYAABO GAAR AH, KA RAADI CAAWIMAAD QAREEN.

TAAGEERADOODA INTII HABRAACA SOCCO WAA BILAASH.



KA DIB MARKII LA II DIIWAANGELIYAY, WAXAA LA I SIYAY DUKUMENTIGA SHEEGAYA INAAN CODSADE AHAY.



HAA. DUKUMENTIGAN WUXUU MUUJINAYAA INAAD CODSATAY MAGANGELYO. WAA MUHIIM. SI AMMAAN AH U HAY.



WAXAAN SAWIR KA QAADAY DUKUMENTIGAYGA OO KU KAYDSADAY TALEEFANKAYGA



AAD U FICAN!

MR FRED, AWOOWGAY WUXUU KU SUGAN YAHAY YURUB. HADDA OO AAN CODSADE AHAY, MA SAFRI KARAA SI AAN UGU BIRO?


HADDA WELI MAAHA. SII JOOG MEESHA LAGAA DIIWAANGELIYAY. MAS'UULIYIINTU, ADIGA IYO MAS'UULKAAGA, WAXAY GO'AAMIN DOONAAN HADDII IYO SIDA LAGULA MIDEYN KARO ISAGA.



KA HOR INTAADAN QAADAN GO'AAN WEYN OO AAD UGA TAGTO HAL DAL UNA GUURTO DAL KALE, LA HADAL MASUULKAAGA AMA QAREEN SI AAD U FAHANTO CAWAAQIBTA.



...SIDOO KALE, SAFARKA KELIGA AHI WAA KHATAR!



WAAN FAHAMSANAHAY INAAN HALKAN KU SII JOOGO.




INTA LAGU JIRO SUGITAANKA WAREYSIGA MAGANGELYADA, DADKA XAGEE AYAY SEEXDAAN OO WAX KA CUNAAN?



MAS'UULIYIINTU WAA INAY KU SIIYAAN MEEL AMMAAN AH OO KUGU HABBOON OO LOOGU YEERO QAABILAADDA. WAXAY KUU SHARRIXI DOONAAN SIDA AAD U HELI KARTO CUNTO IYO ALAABOYINKA LAGAMA MAARMAANKA AH.

CAADI AHAAN, CARRUURTA LA JOOGTA QOYSASKA WAXAY KU NAGAADAAN GURYAHA QOYSKA.




CARRUURTA KELIGOOD YIMAADA WAXAA LAGU MEELEYN KARAA CARRUUR KALE OO XAALAD LA MID AH KU JIRA IYADOO LAGU SALEYNAYO BAAHIYAHOODA.

SARAAKIISHU WAXAY KUU SHEEGI DOONAAN MEESHA AAD KU BARAN KARTO LUGADHA DEEGAANKA...



...ISKUULKA TAGI KARTO, SHAQO HELI KARTO AMA DHAKHTAR ARKI KARTO HADDII LOO BAAHDO.



KA MASHQUUL SUGITAANKA WAREYSIGAAGA OO WEYDII QAREEN AMA MASUUL CAAWIMAAD SI AAD UGU DIYAAR GAROWDO.


HADDII AAD DAREENTO WELWEL, CULEYS AMA CABSII, U SHEEG QOF AAD KU KALSOONTAHAY. SARAAKIISHU WAXAY KAA CAAWIN KARAAN OO KALIYA HADDII AY OGAADAAN WAXA KU WELWEL GALIYA.



ADIGA, MASUULKAAGA AMA DARYEELAHAAGA WAXAAD HELI DOONTAAN CASULUMAD QORAAL AH OO WAREYSIGA LEH TAARIKHDA, WAQTIGA IYO GOOBTA, EMAIL AMA BOOSTA.



CARRURTA WAA IN LALA WAREYSTAA QOF GAABILSAN OO MAS'UUL KA AH, SIDA WAALID AMA ILAALIYE.



MAXAA DHACAYA HADDII AAN XANUUNSANAHAY MAALINTAAS?


ADIGA AMA MASUULKAAGA WAA INAAD ISLA MARKIIBA U SHEEGTAAN MAS'UULIYIINTA.



HAA... MAXAA DHACAYA INTA LAGU JIRO WAREYSIGA MAGANGELYADA?

INTA LAGU JIRO WAREYSIGA, QOF LOO YAQAAN 'SARKAALKA KIISKA' ...

WUXUU KU WAYDIIN DOONAA SU'AALO KU SAABSAN QOYSKAAGA, NOLOSHA GURIGA, XAALADDA AMNIGA HALKAAS, SABABTA AAD U SOO TAGTAY IYO SAFARKAAGA. DHAMMAAN WAXA AAD SHEEGTO WAA QARSOODI, MACNAHEEDU WAA LAMA WADAAGO CID KALE.







UHM... MA FUDUDA IN LA XASUUSTO AMA LAGA FIKIRO DHAMMAAN WAXYAALAHAN...



WAAN OGAHAY, WAY ADAG TAHAY. LAAKIIN SARAAKIISHU WAA TABABARAN YIHIIN OO WAY KU CAAWIN DOONAAN.



QOF AYAA I YIRI WAXAY AHAYD WAX YAR SIDA IMTIXAAN.



ISKU DAY INAAD DIYAAR GAROWDAAN ADIGA IYO MASUULKAAGA AMA QAREENKAAGA.


WAXAAN KA JAWAABI DOONAA. IMMISA AYAY QAADANAYSAA WAREYSIGA?



WAXAY QAADAN KARTAA WAQTI, GAAR AHAAN HADDII TURJUBAAN JIRO HADDII AAD DAALAN TAHAY, WAAD CODSAN KARTAA NASASHO.




MAXAA DHACAYA HADDII AANAN KA JAWAABI KARIN SU'AAL?



ISKU DAY SIDA LIGU WANAAGSAN. HADDII AAD ILOOWDO FAHFHAHIIN GAAR AH, SHEEG. LA WADAAG INTII AAD AWOODO. BOOSKA TAARIKHAHA SAXDA AH, WAXAAD SHEEGI KARTAA HADDII AY AHAYD XILLIGA XAGAAGA AMA XILI UDHOW FASAXA.

KALIYA HA SAMAYN SHEEKOOYIN BEEN AH.




DHAMMAADKA, SARKAALKA AYAA HUBIN DOONA JAWAABAHAAGA ADIGA. HADDII AY JIRAAN WAX AAN SAX AHAYN, WEYDII INAY SAXAAN. WAY ADAG TAHAY IN DIB LOO BEDDELO.

MA KEENI KARRA WARGADO, WARBIXINNO ISKUUL AMA CAAFIMAAD IYO MAQAALADA WARGEYSYADA SI AY U TAAGEERAAN SHEEKADAYDA?


HUBAAL!



...MAXAA LAGA DHIHI KARRA BAYAANNADA SAAXIIBADA AMA QOYSKA AMA SAWIRADA DUKUMENTIYADA SIDA SHAHAADADA DHALASHADA?




HAA, ILAA IYO INTA AY KHUSEYSO SI AAD U SHARAXDO SHEEKADAADA IYO SABABTA KUGU KALIFTAY INAAD SOO TAGTO.



SAAXIIBADA IYO QOYSKA AYAA IGA CAAWIN KARA INAAN HELO MACLUUMAADKAN.



HAA, LAAKIN WAA INAY ISKA ILAALIYAAN KHATAR. U SHEEG SARAAKIISHA HADDII AAD U BAAHAN TAHAY WAQTI DHEERAAD AH.



WAXAY GO'AANSAN KARAAN INAY DIB U DHIGAAN WAREYSIGAAGA HADDII MACLUUMAADKA UU KA CAAWIYO INAY GO'AAN GAADHAAN.



SAAXIIB AYAA YIRI MAS'UULIYIINTU MA EEGI DOONAAN CODSIGIISA MAGANGELYO. MAXAA SABABTA?



MAS'UULIYIINTU MARKA HORE WAXAY HUBIYAAN HADDII AY TAHAY INAY BAARITAAN KU SAMEEYAAN CODSIGA MAGANGELYADA AMA MAYA.




WAXAY U BADAN TAHAY INAYSAN SIDAAG SAMAYN HADDII AAD HOREY UGA HESHAY ILAALIN DAL KALE AMA HADDII AAD KA TIMID DAL AY U ARKAAN MID AMMAAN AH.



MR FRED, MAXAA DHACAYA HADDII QOF RABO INLU JAWAABO LAAKIIN AANU AWOODIN—MALAHA SABABTOO AH WUU CABSII QABAA AMA SU'AALUHU WAA KUWO AAD U SHAQSI AH?



TAASI WAA WAXA KA DUWAN. DADKU WAXAY BAXSADAAN SABABTOO AH WAXAY LA KULMEEN WAX AAD U XUN. WAA DABICI INAADAN RABIN INAAD KA HADASHO.



SIDOO KALE, ISKU DAY INAAD LA WADAAGTO INTII KARAANKAAGA AH, XITAA HADDII AY MURUGO TAHAY AMA AY CEEB KUGU TAHAY. WAX LAGA XISHOODO MALEH HADDII AAD KU DHIIBTOOTO XASLUUSTA AMA AADAN HUBIN WAXA AAD LA WADAAGI KARTO, U SHEEG.

WAXA AAD SOO MARTAY WAXAY NOQON KARTAA MACLUUMAAD MUHIIM AH. SARAAKIISHU WAXAY ISKU DAYI DOONAAN INAY KU DEJIYAAN. WAXAY JOOJIN KARAAN AMA WAY WEYDIIN KARAAN QOF INUU KU SOO BIRO SI UU KUUGU TAAGEERO HADDII AY ARKAAN INAAD DHIIB KU JIRTO.



QOF KASTA OO HALKAN KA SHAGEEYA WAA INUU KU IXTIRAAMAA. HADDII AYSAN SIDAAS SAMAYN, WAXAAD SI RASMI AH U GUDBIN KARTAA CABASHO-WEYDIISO QOF AAD KU KALSOONTAHAY INUU KU CAAWIYO.




WAREYSIGII MAGANGELYADA EE SAAXIIB AYAA LA JOOJIYAY WAXAANA LOO SHEEGAY INUU DHAKHTAR ARKO. SABAB?




UHM... MA GARANAYO FAAHFAAHINTA...

MARARKA QAAR, QOF AYAA LAGA CODSAN KARAA INUU SAMEEYO BAARITAAN CAAFIMAAD, HADDII SARKAALKU U ARKO IN NATIILJOOYINKU KA CAAWIN KARAAN CODSIGA MAGANGELYADA.



WAXAA LAGA YAABAA IN QOFKU LEEYAHAY DHIBAATO CAAFIMAAD AMA CAAFIMAADKA MASKAXDA OO AAN HOREY LOO DIIWAANGELIN UNA BAAHDO DAAWEYN. IYADOO KU XIRAN NATIIJOOYINKA, TALLAABOYINKA XIGA AYAA LA GO'AAMIN DOONAA.




SARAAKIISHU WAXAY KU WEYDIIN DOONAA HADDII AAD OGOSHAY INAAD IMTIXAANKA SAMEYSO. KA ILMO AHAAN, WAALIDIINTAADA AMA MASUULKAAGA AYAA LA HAWLGELIN DOONAA.




UHM... SIDEEN U OGAADAA HADDII LA I SHIYAY MAGANGELYO AMA LA II DIIDEY?



KA DIB WAREYSIGA, SARAAKIISHU WAXAY DIB U EEGI DOONAA DHAMMAAN MACLUUMAADKA WAXAYNA GAARI DOONAAAN GO'AAN KU SAABSAN COPSIGAAGA. WAXAY QAADAN KARTAA WAQTI KA HOR INTAADAN HELIN WARGAD SHARXAYSA GO'AANKA.




WAAN FAHMAI. TAAGI WAA SABABTA AY U DOONAYEEN LAMBARKAYGA TALEEFAN IYO CINWAANKAYGA LA CUSBOONEYSIIYAY, SI AY IILA SOO XIRIIRAN.



HAA! HADDII GO'AANKU UU YAHAY MID TOGAN, DADKA WAY SII NAGAAN KARAAN OO WAXAY HELI KARAAN NOOC ILAALIN AH.



TANI WAXAY NOGON KARTAA XAALADDA GAXOOTINIMO, SAX?




HAA! ...AMA ILAALIN KAABASHO.




LABADA XAALADOODBA, WAXAAD HELI DOONTAA RUKHSAD DEGGENAANSHO SI AAD HALKAN UGU SII NAGAAN KARTO INTA AAD U BAAHAN TAHAY ILAALIN. QAREEN AYAA KUU SHARXI KARRA FAAHFAAHINTA.


HADDII AAD HESHO GO'AAN TABAN, MA SII NAGAAN KARTID SABABTOO AH WAXAA LA GO'AAMIYAY INUU AMMAAN KUU YAHAY INAAD KU LAABATO DALKII AAD KA TIMID AMA DALKA AAD HORAY UGU NOOLEYD.




HADDII AAD DIIDDO, WAXAAD QAADAN KARTAA RACFAAN , TAASOO KA DHIGAN INAAD CODSATO IN KIISKAAGA MAR KALE LA EEGO.




WAA INAAD ISLA MARKIIBA BUUXISAA FOOMAMKA. CODSO CAAWIMAAD. XASUUSO, RACFAAN QAADASHADU WAA KALIYA DIB U EEGIS, MA AHA DAMMAANAD ILAALIN.




HABRAACA DIB
UCELINTA WAA MID
WAAJIB KU AH INAY KU
LAABTAAN MAADAAMA
DALKOODA LOO ARKO
MID AMMAAN AH.



GAAR KA MID AH DADKA AYAA SIDOO KALE
DOORAN KARA INAY SI ISKAA AH UGU LAABTAAN.
U SHEEG SARAAKIISHA SI AAD U HESHO TAAGEERO.



HABRAACA XUDUULDU WUXUU KA DHIGAN YAHAY
IN CODSIGAAGA MAGANGELYADA LAGU BAARO
MEESHA AAD KA SOO GASHAY HAWADA, DHULKA
AMA BADDA.



WAXAA LAGA YAABAA INAAD HALKAA
KU SII JOOQTO ILAA KIISKAAGA LA
GO'AAMIYO OO AADAN SI XOR AH
U DHAGAAGI KARIN.



CARRUURTA LA IMAANAYSA
QOYSKA WAXAY KU JIRI KARAAN
HABRAACA XUDUULDA, KAASOO
SOCONAYA 3 ILAA 4 BILOOD.



CARRUURTA KELIGOOD YIMAADA
KUMA JIRAAN HABRAACA
XUDUULDA, SI KASTABA HA
AHAATEE, WAXAA JIRA DHOWR
KA REEBITAAN.



LAHADAL MASUULKAAGA SI
AAD WAX BADAN U OGAATO.



SU'AASHII UGU DAMBEYSAY... MAXAA DHACAYA HADDII ILMO KA BEEN SHEEGO DA'DOODA SI UU U MUUQDO MID KA YAR AMA KA WEYN?



MAR WALBA U SHEEG SARAAKIISHA DA'DAADA DHABTA AH. HADDII AY SHAKIYAAN, WAXAY CODSAN KARAAN QIIMEYN DA'DA.



WAXAAN KA WADA HADLI DOONNAA QIIMEYN TA DA'DA MS INES KA DIB QADADA. WAA MUHIIM INAAD WAX KA OGAATO.



HAA, AAN WAX CUNO, CALOOSHAYDU WAY GAAJONAYSAY!



MHADSANID!

SOO DHAWOW! WAXAAN IDIN ARKI DOONNAA DHAMMAANTIIN KADIB QADADA MIISKA HOOSTIISA GEEDKA.

ASYLUM

MUHIIM AH

Gudaha wadankaan

Hay'adda mas'uulka ka ah diiwaangelintayda iyo abaabulka wareysiga shaqsiga ah ee magangelyada waxaa loo yaqaan: _____

Masuulkayga magiciisa waa: _____

Waxaan la xiriiri karaa qareen bilaash ah si aan wax uga barto habka magangelyo codsiga iyo si aan isugu diyaariyo wareysigayga.

Tani, waxaan la xiriiri karaa: _____

Haddii aan ka soo horjeesto go'aanka codsigayga magangelyada, waxaan la xiriiri karaa masuulkayga iyo qareen si aan talo uga helo sida loo dacweeyo.

Si loo dacweeyo, macluumaadkan soo socda waa kuwo faa'iido leh: _____

Haddii qof halkan ka shaqeeya, sida saraakiisha, la-taliyayaasha sharciga, shaqaalaha bulshada ama masuulkaaga si xun kuula dhaqmaan, waxaan samayn karaa cabasho oo waxaan la xiriiri karaa: _____

Xaalad degdeg ah, waxaan la xiriiri karaa ambalaaska lambarka _____ ama lambarka booliska: _____



Haddii aan doonayo inaan si iskiis ah ugu laabto dalkayga hooyo, masuulkaygu wuxuu iga caawin doonaa la xiriirka Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM): _____



Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) sidoo kale waxay iga caawin kartaa aniga ama qoyskeyga marka aan qabno su'aalo sharci. UNHCR waxaa lagala xiriiri karaa: _____

Akhbaarta kale ee muhiimka ah _____

KADIS

Waxaan hubinayaa aqoontayda ku saabsan habraaca magangelyada.

Sax jawaabta saxda ah

1 Dadku waxay codsadaan ilaalin caalami ah ama magangelyo sababtoo ah waxay ka cabsadaan inay ku laabtaan dalkooda, halkaas oo iyaga ama qoyskooda aysan ammaan ku noqon doonin.

a. Run
b. Been

2 Mas'uuliyiintu waa inay i diiwaan geliyaan 5 ilaa 8 maalmood gudahood marka aan codsado magangelyo. Xaalado gaar ah, waxaa laga yaabaa inay qaadato ilaa 2 toddobaad.

a. Run
b. Been

3 Waxaan u safri karaa dal kasta oo aan rabo marka aan codsado magangelyo.

a. Run
b. Been

4 Waa muhiim in lala shaqeeyo saraakiisha i weydiinaya su'aalaha inta lagu jiro wareysiga shaqsiga ah ee magangelyada. Haddii aanan xasuusan wax, waan u sheegi karaa iyaga.

a. Run
b. Been

5 Carruurta keligood imaanaysa ma geli doonaan habraaca xuduudka.

a. Run
b. Been

6 Haddii aan su'aalo ka qabo wareysiga shaqsiga ah ee magangelyada, waxaan weydiin karaa masuulka ama qareen. Taageeradoodu waa bilaash.

a. Run
b. Been

7 Saraakiishu waxay ila xaqiijin doonaan macluumaadka ay ururiyeen inta lagu jiro wareysiga shaqsiga ah si aan u saxdo wixii khalad ah.

a. Run
b. Been

8 Haddii aanan tegi karin ballanta wareysigayga gaarka ah ee magangelyada, waxba kama jiraan.

a. Run
b. Been

KADIS

- 9 Way wanaagsan tahay in lala wadaago saraakiisha dhammaan dukumentiyada aan haysto, xitaa haddii ay yihiin sawirro dukumentii oo ku jira telefoonkeyga. a. Run
b. Been
-
- 10 Ka dib wareysiga shaqsigaa ah ee magangelyada, saraakiishu waxay eegi doonaan dhammaan macluumaadka waxayna go'aamin doonaan haddii aan u baahanahay ilaalin ama aan ubaahneen. a. Run
b. Been
-
- 11 Haddii aanan raacsanayn go'aankooda, waxaan la hadli karaa ilaaliyaha ama qareen, waxaana raacfaan ka qaadan karaa go'aankaas. a. Run
b. Been

Kadiska jawabahooda

Suasha 1 : a; Suasha 2: a; Suasha 3: b; Suasha 4: a; Suasha 5: a; Suasha 6: a; Suasha 7: a; Suasha 8: a; Suasha 9: b; Suasha 10: a; Suasha 11: a.

QORAALLO

SOMALI

Buug-yarahan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalka, waxaana keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, EUAA taas oo loogu talagalay dalaika xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025

